- Khabiiro wax ka qabto ardayda waxbarashadoodu hoos u dhacayso.
- Barashada Bulshada Xirfada Todobaadkiiba (PLCs).
- In la isku dhafo manhaj waxbarashada iskuulada oo ka jawaabaya dhaqanka ardayda.

Intaas waxa kale oo dheer, dhammaan macalimiintu waxa ay leeyihiin saacado ay ku xaqiijiyaan in ardayda iyo qoysasku ay la soo xiriiri karaan macallimiinta sidii ay

## Taageerooyinka Waxbarashada

Gargaarkani wuxuu diirada saarayaa sidii uu ardayda u siin lahaa caawimo dheeraad dhinaca waxbarashada ah sidii loo xaqiijin lahaa inay ardaydu wax baranayaan. Waxaan ka mid ah sida in dad waxbarashada ka caawiya la siiyo, laga taageero dhinaca manhajka iyo in macallimiinta la siiyo tababaro lagu horumarinayo aqoontooda macallimino.





uga heli lahaayeen gargaarka ay uga baahan yihiin.
Iskuulada qaarkood sida (Alliance, MLC, Dugsiga Sarre ee Rosemary Anderson) waxa lagu caawiyaa deeq lacageed oo ka timaado dawlada dhexe sidii loo horumarin lahaa waxbarasho ku salaysan mashaariic, waxbarashada barashada xirfadaha, iyo barashada shucuurta bulshada ee lagu taageero ardayda wax ka b arata ee da'da dugsiyada sarre.

**Nidaamyada Ardayda Waxbarashadooda Hooseyso Kor Loogu Soo Qaadayo Iyaga oo La Caawinayo (MTSS) iyo Barashada Shucuurta Bulshada in laga taageero ardayda iyo qoysaska**
**Waqtiga uu Bilaabmayo iyo Waqtigu uu Soconayo: Sanad-dugsiyeedka 2020-21**
**Waaxda ama Jaalkooda: MTSS**

Waaxda kor u soo qaadayso maxsuulka waxbarashada ardayda heerkooda aqooneed hooseeyo waxa ay caawiyaan ardayda iyo qoysaska iyaga oo u fidinaya horumarinta xirfadaha iyo agabyada iskuulada, oo ay ka mid yihiin:

- Nolosha iskuulka dhinacyadiisa fara badan
- In aad looga war hayo ardayda
- Qabashada Kulan Muuqaal-Baahiyaha Dhinaca Barashada Bulshada XIrfadaha.
- Barashada Casharada Shucuurta Bulshada ee iskuulada oo diirada lagu saarayo; sidii loo sameyn lahaa xiriiro, la dhiso xiriirka, abuuritaanka bulshada iyo taageerida adkaysiga marka la waajahayo waqtiyada adag.

Marka la eego heerka iskuulka, MTSS iyo taageerada SEL oo ay ka mid noqon doonaan:
Ku soo dhawaad mar labaad kulanka ardayda ee wacyi-galinta fasalada, waalidka iyo gudidda qoyska, la-taliyaasha, Xirfadalaha Cilmi Nafsiga Iskuulka, iyo Taageerada Shaqaalaha Bulshada, casharada SEL ee ardayda,Aqoon is weydaarsiga SEL qoysaska, agabka waxtarka leh ee joornaalada, shabakada iskuulada, fiidiyaal la iskugu xirayo bulshada iskaashigeeda, iyo Kooxda Jinsiga isku danta ah fudeydiyaashooda,

**Taageerada agabka dijitalka iyo Teknoolajiyada**
**Waqtiga uu Bilaabmayo iyo Waqtiga uu Soconayo: Guud ahaa Dugsiyada Degmada, Dayrta 2020**
**Waaxda ama Jaalkooda: OTIS**

Waxaan sii wadaynaa in bannaanka xarunta xafiiska ee BESC ka sii wadno addeegyadii farsamo ee aan u fidineynay ardayda iyo qoysaska marka ay u baahan yihiin in loo dayactiro iyo/ama loo bedelo qalabaka ay isticmaalayaa ee kumbuyuutarada ama hotspots.
Telefoon lambarka la soo wacaa waa (503-916-3375) iyada oo laguugu diyaar yahay saacada laga bilaabo 7:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabtii (saacadaha waxaa lagu sii kordhiyey ilaa 9:00 habeenimo marka aya shaqaale awoodaa) maalmaha shaqada waxa ay qoysaska kugu caawinayaa dhinaca telefoonka iyaga oo kumbuyuutarada iyo agabyada dijitalka ay diyaar ugu yihiin shaqaale u turjuma.

**Kooxaha Guusha Ardayda (Fasalka 9aad)**
**Waqtiga uu Bilaabmayo iyo Waqtiga uu Soconayo: 2017- ilaa hadda ayuu socdaa**
**Waaxda ama Jaalkooda: Waaxda Diyaar u Noqoshada Shaqada iyo Kullliyada,TOSA, Xarunta Guusha Dugsiyada Sarre/Kooxda u Dooda Ardayda Sidii ay Waxbarasho Tayo Leh u Heli Lahaayeen**

Barnaamijkani socdaa wuxuu fursad siiyaa ardayda fasalka 9aad macallintooda sidii ay u xaqiijin lahaayeen in fasalada sagaalaad u heli lahaayeen ama ay

## Taageerooyinka Waxbarashada

Gargaarkani wuxuu diirada saarayaa sidii uu ardayda u siin lahaa caawimo dheeraad dhinaca waxbarashada ah sidii loo xaqiijin lahaa inay ardaydu wax baranayaan. Waxaan ka mid ah sida in dad waxbarashada ka caawiya la siiyo, laga taageero dhinaca manhajka iyo in macallimiinta la siiyo tababaro lagu horumarinayo aqoontooda macallimino.

## Barnaamijyada Taageerada Waxbarashada: Faahfaahin buuxda

ugu taagnaan lahaayeen tubtii ay ku qalin jabin lahaayeen. Kooxuhu waxa ay isticmaalaan xog la ururiyey iyo aragti ah in diirada lagu saaro midabtakoor la'aan lagu yareynayo faraqa u dhexeeya ardayda, iyo in la wadaago fikiradaha waxtartka u leh waxbarashada iyo in xili hore wax laga qabto sidii higsiga loo gaadhi lahaa. Barnaamijku wuxuu ka socdaa dugsiyada degmada oo dhan iyada oo hoggaamiyaashu ay la kulmaan iyaga oo la wadaagaya bulshada agabyada iyo wixii shaqo ee dheeraad ah.

**Macallinka Shaqo Gaar ah Loo Xilsaaray (TOSA)**
**Waqtiga uu Bilaabmayo iyo Waqtiga uu Soconayo: Dugsiyada Degmada oo dhan, Dayrta 2020**
**Waaxda ama Jaalkooda: OTIS**
Macallinka Shaqo Gaar ah Loo Xilsaaray (TOSA) wuxuu siiyaa taageero sidii loo meelmarin lahaa barnaamijyada waxbarashada ee degmada gaar ahaa casharada muhiim ah. Taageeradoodu waa horumarinta iyo istaraatijiyada wax barista iyaga oo la kaashanaya bulshada waxbarashada iyaga oo u ah taageero dheeraad iskuulka.
Waqtigani, iskuulada waxa joogaa hal macallin oo shaqo gaar ah loo xilsaaray (TOSA) ama saddexda qeybood ee soo socda: waxa ay si toosa ugu xiran yihiin sidii ay fulin lahaayeen himilada la higsanayo dhinaca maalgalinta barnaamijka, inay taageeraan Waxbarashada Muhaajiriinta- ardayda guur guura, iyo taageerada MTSS (addeegyada iyo taageerada nidaamka isku dhafan).

**Barnaamijka Waxbarashada Muhaajiriinta (Ardayda Guur Guurta)**
**Waqtiga uu Bilaabmayo iyo Waqtiga uu Soconayo: Wuu socdaa**
Barnaamijkani waa ardayda aad u guur guurta sababtoo ah qoysaskooda ayaa ka shaqeeya beeraha, kalluumeysiga ama dhirta iyo daaqa. Barnaamijka Waxbarashada Muhaajiriinta (MEP)wuxuu bixiyaa :
- U meerin dheeraad ah dhinaca casharada ah.
- In qoysaska lala shaqeeyo iyaga oo dhinacyo badan laga caawinayo.
- In la ogaado ardayda ku hadasha luqado fara badan iyo qoysaskooda.

Wixii macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa buug yaraha, ama waxaad wacdaan (503) 735-5697.

**Barnaamijka Waxbarashada Hindida Maraykan ah**
**Waqtiga uu Bilaabmayo iyo Waqtiga uu Soconayo: Wuu socdaa iyo 2020-21 AY**
**Waaxda ama Jaalkooda: Barnaamijyada La Maalgaliyo, Iskaashiga Bulshada: Beeraha Nasashada Portland, METRO, PCC, PSU, PNCA (Kulliyada Farshaxanka Pacific NW), NAYA, NARA**
Barnaamijyada Dugsiyada Dadweynaha Portland ay siiyaan Hindida Maraykanka ah:
- Isku xirka iyo taageerada waxbarashada.
- In la siiyo waxbarasho la jaanqadaya dhaqankooda iyada oo lagu xirayo ardayda taariikhdooda Asalka, dhaqamada, iyo caadooyinka, kor loo qaado qabkooda iyo inay helaan kalsooni ay kaga dabaashaan caqabadaha waxbarashada.
- Shaqaalaha Waxbarashada Hindidu waxa ay sii wadi doonaa inay la xiriiraan qoysaska dhinaca telefoonka, email, iyo iyaga oo sahan ka qaadaya lagu qiimeeyo waxbarashadooda iyo baahidooda bulsho iyo waliba taageerada xiriirka jira hadda.
- Aqoon isweydaarsi dhinaca muuqal baahiyaha dhammaan ardayda da' kasta, iyo in muuqaal baahiyaha lagu booqdo fasalada marka ay haboon tahay.
- Sanadkani waxaan sii wadi doonaa in barnaamijkeena isku xirka ee ardayda



## Taageerooyinka Waxbarashada

Gargaarkani wuxuu diirada saarayaa sidii uu ardayda u siin lahaa caawimo dheeraad dhinaca waxbarashada ah sidii loo xaqiijin lahaa inay ardaydu wax baranayaan. Waxaan ka mid ah sida in dad waxbarashada ka caawiya la siiyo, laga taageero dhinaca manhajka iyo in macallimiinta la siiyo tababaro lagu horumarinayo aqoontooda macallimino.

fasalada 8aad sidoo kale bulsho, waxbarasho iyo kooxda dhaqanka ardayda fasalka 9aad.
- Ardayda fasalada waxbarashada bilowga ah ee Cherokee.
- Mashruuca madadaalada ee dugsiyada hoose.
- In la wargaliyo ardayda u baahan in waxbarashada laga caawiyo.
- Barnaamijkani wuxuu sii socon doonaa sidii uu ula shaqeyn lahaa jaalkiisa bulshada (sanadkani waa cusub PNCA iyo Madxafka Holocaust Yuhuuda iyo Dhisida Rajada) sidii ay u siin lahaa fursadaha jira ardaydeena dugsiyada sarre.
- In laga caawiyo tababarada horumarinta xirfadlayaasha iyaga oo lala wadaagayo habka ugu wanaagsan ee loo meelmarinayo Taariikhda Qabiilada/ Lala Wadaagayo Taariikhdooda.

Barnaamijkani wuxuu u furan yahay xubanaha qabiilooyinka Hindida Maraykanka ah ee diiwaangashan.
Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan waxaad email u dirtaa agaasimahayaga Angie Morrill ee amorrill@pps.net ama Indianeducation@pps.net. Fadlan waxaad ka fiirisaa shabakadayada https://www.pps.net/indian-education.

**Barnaamijyada u Diyaargarowga Shahaadada Koowaad iyo Helitaanka Baraaruga Xiliga Hore(Gear Up)**
Oregon GEAR UP (Barnaamijyada u Diyaargarowga Shahaadada Koowaad iyo Helitaanka Baraaruga Xliga Hore) –waxa lagu caawiyaa deeqda ka timaada Waaxda Waxbarashada Maraykanka iyo qaadhaano fara badan oo ka yimaada saaxiibada bulshada.
Himilada barnaamijka GEAR UP waa sidii loo xaqiijin lahaa ardayda dugsiyada dhexe iyo kuwa dugsiyada sarre ee waalidiintoodu dhaqaalahoodu hooseeyo sidii ay diyaar ugu noqon lahaayeen, u higsan lahaayeen iyo sidii ay u guuleysan lahaayeen waxbarashada dugsiga sarre ka dambeysa haddii ay tahay shahaadada koowaad, shahaadada labada sanno, shahaado, shaqo barashada ama tababaro kale.
Barnaamijkeena GEAR UP wuxuu hadda taageeraa ardayda 12 kooxood oo ka mid ah Jefferson, Madison iyo Roosevelt aagooda.

**Waxbarashada Bilowga ah /Waxbarashada Xilliga Hore oo tayo leh**
Dayrtani, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay bixin doonaa barnaamijyo muuqaal baahiyaha loo addeegsan doono Waxbarada Xilliga Hore(PK) ardayda u qalma ee da'doodu tahay 3 sanno iyo 4 sanno iyada oo laga bixin doono 12 goobood oo kala duwan kuna yaala iskuulada.
Sida loogu qalmayaa barnaamijyadani waxa sal u ah dhinaca dakhliga qoyska. Barnaamijyadeen Waxbarashada Xilliga Hore (PK) waxaa ka mid ah waxbarasho ku ay ku lammaan tahay ciyaaro sidoo kale lagu ladhay taageerada ay ka mid yihiin cuntada, caafimaadka xiska iyo taageerada caafimaadka, taageerada laxaad la'aanta, waxbarashada qoyska, iyo isku xirnaanta bulshada.
Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan waxaad booqataa shabakada Waxbarashadayada Xilliga Hore (PK).

**Iskuulada Bulshada SUN**
**Waaxda ama Jaalkooda: Mult Co & Hay'adaha hoggaamiya SUN dhaqanka u gaarka ah**
Waa meesha bulshada oo dhami iskugu timaado sidii loo xaqiijin lahaa inay ay ardaydu iskuulka ku guuleystaan iyada oo qoysasku degan yihiin iyaga oo ku xirmaya taageerooyinka faraha badan.



## Taageerooyinka Waxbarashada

Gargaarkani wuxuu diirada saarayaa sidii uu ardayda u siin lahaa caawimo dheeraad dhinaca waxbarashada ah sidii loo xaqiijin lahaa inay ardaydu wax baranayaan. Waxaan ka mid ah sida in dad waxbarashada ka caawiya la siiyo, laga taageero dhinaca manhajka iyo in macallimiinta la siiyo tababaro lagu horumarinayo aqoontooda macallimino.

## Barnaamijyada Taageerada Waxbarashada: Faahfaahin buuxda

**Maalgalinta Dugsiyada Dadweynaha Portland**
**Waaxda ama Jaalkooda: Maalgalinta Dugsiyada Dadweynaha Portland (The Fund for PPS)**
Maalgalinta PPS waxa ay la shaqeeyaan ganacsiga deegaan iyo bulshada deeqaha ballaaran bixiya sidii loo siin lahaa gargaar toos lagaga caawinayo (raashinka, sidii internet loogu xiri lahaa, iwm), taageerada waxbarashada (in la siiyo cid ka caawisa waxbarashada) ardayda PPS iyo qoysaska xilliga dayrta. Sidoo kale maalgalintu waxa ay kala shaqeeynayaan shirkadaha ay iskaashadaan sidii loo maalgalin lahaa Qalabka Fasalada iyaga oo ku hadlaya magaca ardayda PPS.
Maalgalinta Dugsiyada Dadweynaha Portland oo iskaashi la leh kooxda PPS waxa ay ku qaban doonaa Muuqaal baahiyaha barnaamij siinaya ardaydu inay ka helaan waxbarashada ka caawiya macallimiinta ugufiican dugsiyada.

**Qalabka Fasalka**
Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxa ay ka shaqeynayaa sidii ay u siin lahaayeen dhammaan ardayda u qalanta Qalabka Fasalka Lagu Isticmaalo si loo xaqiijiyo in dhammaan ardaydu hasytaan qalabkii ay u baahnaayeen sidii ay waxbarashada ugu guuleysan lahaayeen waqtigani aan ku jirno.

**Istaraatijiyada 4aad ee RESJ: Waqtiga Waxbarashada oo La Dheereeyo iyo Waxbarashada Iskuulka Marka uu Xidhmo Ka Dib La Bixiyo**
**Waaxda ama Jaalkooda: Ciyaarta Shaxda ee Guusha, Ururka Deegaanka Magaalada. Daryeelayaasha Caruurta ee Sharciga Leh**
Barnaamijku wuxuu bixiyaa jawi nabdoon, hawlo loogu talogalay inay kor u qaadaan waxbarashada ardayda marka iskuulku xirmo maalintii. Waxaa ka mid ah barnaamijka ardayda lagu caawiyo maalintii marka iskuulka la xiro. Hawlaha iskuulka marka la xiro la siiyaa waa fursado ardayda ay ku gaarayaan waxa ay iyagu jecel yihiin inay bartaan iyo kartidooda ku ogaadaan. Cilmi baaris ayaa waxa ay sheegtay ardayda ka qeybqaadata barnaamijkani inay kordheyso waxbarashadoodu iyo inay ka soo xaadiraan iskuulka waxbarashadiisa. Halkan hoose waxaa ku qoran liistada barnaamijyada gaarka ah iyo iskuulada la rajeynayo inay addeega barnaamijyada bixiyaan:

| Iskaashiga RESJ | Iskuulada Addeega Bixiya 2020-21 |
|---|---|
| Ciyaarta Shaxda ee Guusha | Kelly, Cesar Chavez, Lent, Bridger, Lane, Ockley Green, Roseway Heights, Harriet Tubman, Faubion, Harrison Park, Beach, Chief Joseph, Harvey Scott, James John, Rosa Parks, King, Rigler, Sabin, Sitton, Vernon, Vestal, Whitman, Woodlawn |
| Ururada Deegaanka Magaalada | Harriet Tubman, Faubion, Cesar Chavez, Ockley Green, Roseway Heights |

## La haanshaha iyo Ku Xirnaanta

Taageeradani waxa ay diirada saarayaan sidii ay uga gargaari lahaayeen taageerada shucuurta iyo bulshada oo ay ka mid yihiin la-talin, inay helaan shaqaalaha gargaarka bulshada ama daryeel bixiye caafimaadka xiska, kulan kooxeed loo qabto, iyo horumarinta hoggaaminta.



## La Lahaanshaha iyo Ku Xirnaanta: Faahfaahin dhammeystiran

**Taageerada Qoyska ee Ku Salaysan Iskuulka iyo Xiriirka**
**Waqtiga uu Bilaabmayo iyo Waqtiga uu Soconayo: Xaggaaga, 2020 iyo Sanad-dugsiyeedka 2020-21**
**Waaxda ama Jaalkooda: Iskuulada Qaar ka Mid Waxa Laga Caawinayaa Xafiiska Xarunta Dhexe**
Iskuulku waxa ay siiyaan qoyska gargaar kala gedisan iyo inay ku xiraan fursadaha ilaa xaggaaga sanad-dugsiyeedka 20-21. Gargaar fara badan oo hadda jira oo la bixin jiray sanadihii la soo dhaafay waa ay sii socon doonaan iyo fursado cusub la heli doono. Sidoo kale iskuuladu waxay ku xiran yihiin qoyska siiyaan cunto, kaararka lacagtu ku jirto la hibooyo, caafimaadka xiska, gargaarka kirada guryaha, iwm. Tusaalayaasha gargaarka waxaa ka mid ah:

- Kulanda qoyska iyo booqashada Bannaanka Guriga.
- Iskuulada Bulshada ee SUN.
- La-taliyaasha ardayda, shaqaalaha gargaarka bulshada, iyo la taliyaha Jawiga Taban ee Iskuulka.
- Ururka Macalinka-Waalidka (PTA) iyo guddiyada waalidiinta oo dheeraad ah .
- Golaha Hoggaanka Qoyska.
- Wada Halada Bulshada iyo Kulanada Degmada.
- Joornaalka Iskuulka ee qoyska.
- Munaasabadaha Iskuulka iyo munaasabadaha bulshada.
- Iskaashiga bulshada, sida Hacienda, Latino Network, I Am Learning, Urban League, IRCO, Coalition of Black Men, Rowing Club of Portland, Camp Caldera.
- Kooxda SEL oo si toosa ula xiriiraya qoysaska.
- Qoyska ama waalidiinta kulankooda bunka ama Makhaayada Waalidiinta Laati-inuhu ku wada kulmaan ama shaqaalaha.
- Taageerada Wakiilada Bulshada.
- Habeenka Qoyska Madow Sanadkii Mar La Qabto.
- Ardayda Qoysaska aan Caddaanka ahayn.
- Sinaanta Sinjiga Waalidiinta.
- Kooxda Waalidiinta ee Isku Danta ah.
- Mashruuca Booqashada Gurga Macallin-Waalid.
- Taageerooyinka Caafimaadka Xiska.
- Tukaanka Iskuulka.

**La-Taliyaha Dhinaca Imaansha Iskuulka**
**Waaxda ama Jaalkooda: MTSS**
Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay aqoonsan yiiin muhiimada ay leedahay in ardayda yimaadaan maalin kasta iskuulka iyo sida ay isku xiran yihiin inay ardaydu guuleystaan. Waxa aan dhiseynaa habnidaamiye yareynaya maqnaashaha faraha badan ee caadiga noqday iyo barnaamijyo lagaga hortagayo.
La-taliyaasha imaanshaha iskuulku waxa ay taageeraan iskuulada iyo shaqaalaha bulshada sidii ay u dhisi lahaayeen xiriirka kale duwan ee qoysaska, sidoo kale ay qaadaan dadaal degdeg ah sidii loo caawin lahaa ardayda iyo qoysaska baahiyaha waaweyn qaba.

**Dib u Soo Celinta Cadaalada (RJ)/Dib Hagaajinta Xiriirka Dhaawacmay**
**Waaxda ama Jaalkooda: Nidaaamyada Ardayda Waxbarashadoodu Hooseysa Lagu Caawiyo (MTSS), Shucuurta Bulshada, Barashada (SEL), Kooxda Jawaabta Degdega ah (RRT), Macallimiinta Shaqo Gaar ah Loo Xilsaaray (MTSS)**
Dib u Soo Celinta Cadaalada (RJ) waxaa loogu talogaly sidii ay caawin lahaayeen in la helo xiriir caafimaadqaba, taageero leh, dib u milicsanaya, iyo bulshada laga wada mid yahay.

## La haanshaha iyo Ku Xirnaanta

Taageeradani waxa ay diirada saarayaan sidii ay uga gargaari lahaayeen taageerada shucuurta iyo bulshada oo ay ka mid yihiin la-talin, inay helaan shaqaalaha gargaarka bulshada ama daryeel bixiye caafimaadka xiska, kulan kooxeed loo qabto, iyo horumarinta hoggaaminta.

Dib u Soo Celinta Cadaaladu(RJ) waxa ay siisaa iskuulada iyo qoysaska taageero ay kaga jawaabcelinayaa nidaamyadii ay ku hagaajinayaa wixii xumaaday,iyo in bulsho ahaan heshiis la yahay, waxa kale oo ay bixiyaa RJ tababaro, iyo gargaar tilmaamo lagu siinayo.
Barnaamijyada iyo Dib u Soo Celinta Cadaadalada waxa dhammaan laga hirgaliyaa iskuulada PPS.

## La-taliyaasha Iskuulada

Dhammaan Iskuulada PPS waxa ay leeyihiin la-taliyaasha ardayda. La-taliyaashu waxa ay diirada saaraan caawinta ardayda sidii looga hadli lahaa waxbarashadooda, shakhsi/bulsho, iyo horumarinta xirfada shaqada iyo baahiyahooda.
La-taliyaashu Iskuulku waxa ay ka shaqeeyaan sidii ay kor ugu qaadi lahaayeen jawiga waxbarashada oo nabadgelyo leh dhammaan bulshada iskuulka iyo in si joogta ah isha loogu hayo lagana jawaabo arrimaha khuseeya anshaxadooda dib u dhaca ku keenaya jawiga iskuulka, sida cago jugleynta, ardayda iska hor imanaya, iyo khilaafka macallinka-ardayga.Barnaamijyada wanaagsan ee iskuuladu waxa ay iskaashi ka dhexeeyaa la-taliyaasha iskuulka, macalimiinta, qoysaska, iyo macallimiin kale sidii ay abuuri lahaayeen jawi horumarsan oo ay ardaydu ku guuleysato, xiriir firfircoon, in fursadaha waxbarashada si siman loo wada helaa, iyo manhaj wanaagsan dhammaan ardayda hesho.

## Shaqaalaha Gargaarka Bulshada / Daryeel-bixiye Caafimaadka Xiska

Inta badan iskuuladeenu waxa ay leeyihiin Shaqaalaha Gargaarka Bulshada iyo/ama Daryeel-bixiyaasha Caafimaadka Xiska kale, kuwaasi oo ka garab shaqeeya qoysaska iyo ardayda sidii loo yareyn lahaa caqabadaha waxbarashada iyo in la kordhiyo ardayda/qoyska codkooda.
Shaqaalaha Gargaarka Bulshadu waxay si dhow ula shaqeeyaan ardayda, macallimiinta, maamulayaasha, iyo macallimiinta kale, daryeel bixiyaasha waxa ay siiyaan horumarka ardayda dhinaca waxbarashada iyaga isku duwaya, siinaya dadaal lagaga jawaabayo waxyaabo dhaqankiisa waafaqsan iyo lana xoojinaya sidii loo siin lahaa tallo lagu dhisayo qoyska iyo ardaydaba.
Shaqaalaha Gargaarka Bulshada waxaa ka go'an inay diirada saaraan sinaanta jinsiga iyo cadaalada bulshada iyada oo laga shaqeynayo sidii loo baabi'in lahaa nidaamka dib u dhaca wataSh.
Shaqaalaha Gargaarka Bulshadu waxay ay ka taageeraan bulshada sidii ay u faham lahaayeen nidaamka, sida loo wadaago agabyada, sida la isku xidho ardayda iyo qoysaska, sida addeegyada gargaarka loo horumariyo ee ku salaysan ardayda/qoyska/shaqalaahu u ogaan lahaa waxyaabaha xiisaha galiya ee iskuulada.

## U Doodayaasha Dhallinyarada SUN

### Waaxda ama Jaalkooda: Mult Co via Hacienda CDC, Latino Network, Self Enhancement Inc, Xarunta Qoyska NAYA, IRCO, Impact NW

Maareynta arrimaha Dhallinyarada ee lagu taageerayo qoysaska waxbarashada ardayda iyo sidii loo dhsi lahaa xirfadaha caruurta da'doodu u dhaxayo 12 sanno ilaa 18 sanno.

## Istaraatijiiyada RESJ 3: Horumarinta Hoggaamiyaasha/Hagitaanka

### Waaxda ama Jaalkooda: Center for Intercultural Organizing, Coalition of Black Men, IRCO, Latino Network, Michael Grice, POIC, REAP Inc.,The I Am Academy, Horizons Counseling

Addeegani waxaa loogu talogalay sidii uu u bixin lahaa horumarinta xiriir taban



## La haanshaha iyo Ku Xirnaanta

Taageeradani waxa ay diirada saarayaan sidii ay uga gargaari lahaayeen taageerada shucuurta iyo bulshada oo ay ka mid yihiin la-talin, inay helaan shaqaalaha gargaarka bulshada ama daryeel bixiye caafimaadka xiska, kulan kooxeed loo qabto, iyo horumarinta hoggaaminta.

La Lahaanshaha iyo Ku Xirnaanta: Faahfaahin dhammeystiran

iyo taageerada ardayda sidii loo hoos loogu dhigi lahaa xadiga anshax-marinta aan isku dheelitirneyn iyo waliba sidii kor loogu soo qaadi lahaa in ardayda aan cadaanka ahayni iskuulka uga soo xaadiri lahaayeen iyaga oo dareemaya in ay iskuulka qeyb ka yihin. Tani waxa ay ka mid tahay xiriirka taban ee kala gedisan ee ay ardaydu dib u milicsanayaan dhaqankooda iyo meesha ay ka soo jeedaan.
Hoos waxaa ku qoran barnaamijyo gaar ah iyo iskuulada la rajeynayo in barnaamij kastaa bixiyo.

| Iskaashiga RESJ | Iskuulada Addeegyada Bixiya 2020-21 |
|---|---|
| Center for Intercultural Organizing (CIO) | Cesar Chavez, Harrison Park, Ockley Green |
| Coalition of Black Men | Astor, Ockley Green, Harriet Tubman |
| Immigrant and Refugee Community Organization (IRCO) | George, Harrison Park, Roseway Heights, Lane |
| Latino Network - Conexiones and Colegio de Padres | Harrison Park, Roseway Heights, Lane, Ockley Green, Cesar Chavez |
| Michael Grice - Ambassadors | Rosa Parks |
| Portland Opportunities Industrialization Center (POIC) | Cesar Chavez, Lent, Bridger, Harrison Park, Roseway Heights, Rosemary Anderson, Vernon |
| REAP Youth Leadership Program | Bridger, Beach, Lane |
| The I Am Academy (TIAA) | Roosevelt, Franklin |
| Horizons Counseling - Youth Empowerment Program (YEP) | Roseway Heights, Vestal, Franklin, Harrison Park, Ockley Green, George, Arleta, Cleveland |

## Istaraatijiyada 5 ee RESJ: U Doodista iyo Horumarinta Aqoosiga Dhaqanka Taban

### Waaxda ama Jaalkooda: Dadaalada Waalidka Madow, IRCO, Xarunta Qoyska NAYA

Ka qeybgalayaasha dhallinyarta ah barnaamijkani wuxuu siiyaa dareen iyo fursad ay ku qabtaan hawlo xoojinaya sidii ay u heli lahaayeen kalsooni iyaga oo u aqoonsanaya si taban una ilaaliyaan dhaqankooda iyo caadooyinkooda da' yartooda. Hawluhu waxa ay ardayda siiyaan fursado ay ku bartaan dariiqooyin cusub oo ay isku sharxayaan jawiga dhaqankooda xaqiijinaya oo nabadgelyo leh.
Hoos waxaa ku liistada barnaamijyada iyo iskuulada la rajeynayo inay barnaamij kasta bixiyaan:

| Iskaashiga RESJ | Goobaha Iskuulada Bixinaya 2020-21 |
|---|---|
| Dadaalada Waalidiinta Madow | Faubion, Beaumont |
| Immigrant and Refugee Community Organization (IRCO) | George, Lane, Harrison Park, Roseway Heights |
| Xarunta Qoyska NAYA | District-wide |

## Hay'ada Iskaashiga Caafimaadka Xiska Bulshada oo Laga Helayo Goobta "(Iskuulka)"

Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxa ay dhowr daryeel-bixiyaasha bulshada caafimaadka xiska ka mid ah ee ku sugan iskuulada la leeyihiin heshiis qandaraas daryeel-bixiyaasha BIPOC.

## Rajada Dariska

Waaxda ama Jaalkooda: Degmada Multnomaha (Mult Co)
Addeegyada dhaqanka oo gaar ah sidii loogu taageeri lahaa caruurta aan cadaanka ahayn ee da'doodu u dhaxayso 12 jir ilaa 17 jir iyo qoysaskooda.



## La haanshaha iyo Ku Xirnaanta

Taageeradani waxa ay diirada saarayaan sidii ay uga gargaari lahaayeen taageerada shucuurta iyo bulshada oo ay ka mid yihiin la-talin, inay helaan shaqaalaha gargaarka bulshada ama daryeel bixiye caafimaadka xiska, kulan kooxeed loo qabto, iyo horumarinta hoggaaminta.

**Barnaamijka McKinney-Vento**
**Waqtiga uu soconaya: Sanad-dugsiyeedka 2020-21**
Waxaa hore loogu magacaabi jiray Title X, barnaamijka McKinney-Vento wuxuu si toosa ah u siiyaa taageero ardayda la kulma hoy la'aanta ama aan haysan hoy sugan. Iskuuladu waxa ay u isticmaali karan online McKinney Vento meel ay u diraan ardayda. Ardayda iyo qoyskoodu iyaguna waa la xiriir karaaniyaga oo wacaya xiriiriyaha liistada iskuulkooda McKinney-Vento ee xaashi yara ku qoran ama waxay wici karaan (503) 916-5770. Ardaydu waa inay caddeeyaan inay u qalmaan sanadkiiba.

**Daryeelka Caruurta**
**Waaxda ama Jaalkooda: Barnaamijyaad Waxbarashada Xilliga Hore**
Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxa ay bilaabayaan sidii ay u soo bandhigi lahaayeen inay ka furaan dhismayaasha ku yaala sagaal iskuulada in laga furo labo kooxood oo iskaashanaya barnaamijka daryeelka caruurta oo aan ka badneyn iskuulkiiba 30 arday.
Dugsiyada Dadweynaha Portland waxa ay taageerayaan shaqaalaha iskaashiga daryeelka caruurta sidi ay u gargaari lahaayeen ardayda waqtiga ay waxbarashadii ku qaadanayaan guryaha.
Barnaamijyadani waxa ay u shaqeyn doonaan si madax bannaan iyaga oo ah hay'ado daryeelka caruurta oo sharciya. Daryeel-bixiyaashu waxa ay ku shaqeeyaan shatiyo sharciya oo aad loo adkeeyey iyaga oo raacaya tilmaamo loo dhigay heerka ay ku shaqeyn karaan nidaamyada daryeelka caruurta. Boqolkiiba konton boosaskani waxaa loo qabtay qoysaska u qalma in ay qaataan gargaarka qoyska gobolku bixiyo. Sidaas darteed boosasku waa ay xadidan yihiin iyada oo si degdeg ah loo buuxin doona, waxaan qoysaska la socodsiineynaa inay soo wacaan 211 wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan daryeelka caruurta sida loo codsado iyo macluumaadkaa lagu kabo.
Si ay qoysasku u helaan gargaarkii ay baahnaayeen ee xannaanada caruurta, waxa aan la shaqeyneynaa Agabyada Xannaanada Caruurta iyo U Gudbiyaasha sidii ay u siin lahaayeen kulano macluumaad fara badan hay'adaha SUN, Xiriiriyaasha P-3 waxa ay xiriirin wakiilada bulshada sidii loo taageeri lahaa qoysasku si ay u heeln shabakada kaka nee doorashooyinka xannaanada caruurta

**Addeegyada Cuntada PPS**
Addeegyada Cuntada ee Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxa ay 36 iskuul siin doonaan cuntooyin marka aad timaado aad hore ka soconeyso marka aad qaadato (Qaado oo Hore Ka Soco). Qof kasta caafimaadkiisa, cuntadani la qeybin doonaa waxa lagu qeybinayaa bannaanka iskuulada, soo soco ama baabuurkaaga soo wado ilaa bisha Sebtamber 2deeda. Iskuulada Lane iyo Dugsiga Dhexe Ockley Green waxaa liistada lagu dari doonaa iskuulada marka aad timaado hore aad ka qaadanayso cuntada bisha Sebtamber dhexdeeda (waxa dib loogu dhigay waxaa ka socda dhismo dhammaanaya).
Goob kastaa waxa ay addeegyada bixin doontaa saacadaha 3:00-5:00 pm maalmaha Isniinta iyo Arbacada, waxa ay bixinayaa quraac iyo qado maalin kasta oo ah jadwalka iskuulka.
Cuntadu waa bilaa lacag dhammaan ardayda wax ka barata 38 meelood ee cuntada laga qaybiyo, ama wax ka barta goobaha Bulshooyinka Xaqa u leh (CEP) ee 2020-21, iyo kuwa u qalma qof ahaan cuntada qiimaheeda hoos loo dhigay ama bilaashka ah. Sanadkani cusub- Oregon waxa ay ballaariyeen heerka dakhliga ay ugu qalmayaan ardaydu inay helaan cuntada bilaa lacagta ah laga bilaabo 185% ilaa heerka fakhriga 300% ee ay u dhigtay dawlada dhexe, waxaan lagu dhiirigalinayaa qoysaska inay booqdaan shabakada Addeegyada Cuntada



## Agabyada iyo Taageerada Qoyska

Kuwani waa taageerada la siiyo daryeel-bixiyaal dhaqan gaar ah leh sidii ay beegsan lahaayeen jinsiga gaarka ah/asalka ama kooxaha ardayda ee luqado gaar ah ku hadla.





wixii macluumaad dheeraad ah sida loo dalbado haddii aad u qalanto.
Cuntada ardayda guryaha loogu geynayo iyada oo la isticmaalayo Gaadiidka Waaxda Gaadiidka- Waxaa la idinla wadaagi doonaa foomka la iska diiwaangaliyo sida ugu degdeg badan iyada oo dhammaan luqadaha la taageero oo dhan ku qoran yahay sidii ay qoysaska oo dhami u heli lahaayeen addeegani laga qeybiyo 38 goobood ee marka aad timaado aad ka qaadan karto. Guryaha in loogu geeyo ardayda waxa ay ku xirnaan doontaa tirada soo codsata.

**Suuqa Cuntada ama Tukaanka Cuntada SUN**
**Waaxda ama Jaalkooda: Mult Co via, Oregon Food Bank, IRCO, Latino Network, Impact NW, Portland Parks & Rec, Self Enhancement Inc.**
Tukaanada Cuntada ama suuqyada cuntada bilaashka ah ee Bulshada Iskuulada SUN ay siiyaan qoysaska.

**Iskuulada SUN P-3**
**IskaashigaP: Mult Co via Latino Network**
Iskuulada Bulshada SUN waxa ay diirada si qoto dheer u saarayaan qoysaska kala duwan ee haysta caruurta da'doodu yar tahay. Iskuulada P-3 waxa ay bixiyaan barashada ay ku dhafan tahay ciyaaraha kooxaha ay da'doodu u dhaxayso 0-5 sano; hawlaha hoggaaminta waalidka,iyo taageerada qoysaska.
((Parent Teacher Family Visits))
Booqashooyinka Qoyska Macallin-Waalid
Waaxda ama Jaalkooda: Taageerada Farsamo ee ay bixiyaan Multnomah County.

**Parent Teacher Family Visits**
**Waaxda ama Jaalkooda: Technical support provided by Mult. Co.**
Booqashooyinka guriga waqtiga lagu jiro sanad dugsiyeedka waxa uu dhisayaa iskaashiga waalidinta xoojinayana waqtiga kala guurka ee xannaanada caruurta. Waqtiga aan ku jiro xannaankani faafaya booqashooyinka guryuhu waxa ay noqon doonaa muuqaal baahiyaha, in lagu wada sheekeysto fiidiyow ama telefoon lagula hadlo qoysaska.

**Helitaanka Gaadiidka**
Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS), waxa ay iskaashi la leeyihiin Trimet, oo siiya dhammaan ardayda dugsiyada sarre aqoonsiga ardaydinimada oo u shaqeeya kaarka baska lagu raaco Trimet oo sanadle ah. Dhaafiyaha baska lagu raaco waa diyaar iyada oo ay ku xiran tahay si ay baahidu tahay qofka la taageerayo. Shirkada Lyft dhaafiyaheeda lagu raaco sii socod iyo soo socod waa tiro kooban oo kaliya la siiyo dadka xaaladooda baahiyeed ay aad u adag tahay. Fadlan waxaad la xiriirtaa iskuulkaaga sidii aad u heli lahayd agabyadaasi.



## Agabyada iyo Taageerada Qoyska

Kuwani waa taageerada la siiyo daryeel-bixiyaal dhaqan gaar ah leh sidii ay beegsan lahaayeen jinsiga gaarka ah/asalka ama kooxaha ardayda ee luqado gaar ah ku hadla.

**Addeegyada Helitaanka Gargaarka Luqada**
**Waqtiga ay Soconeyso: Dugsiyada Degmada oo dhan, Wuu socdaa**
**Waaxda ama Jaalkooda: Waaxda Addeegyada Helitaanka Gargaarka Luqada**
Waaxda Addeegyada Helitaanka Gargaarka Luqada PPS waxa ay bixisaa addeegyada turjumida qoraalka iyo afkaba in ka badan 110 luqadood oo ka tirsan dugsiyada degmada oo dhan.
Qoyskaagu wuxuu xaq u leeyahayinuu iskuulka ardaygiisa weydiisto in loo qabto shaqaale u turjuma- addeegyadani waa bilaa lacag marka qoysaska loo turjumayo.
Haddii aad rabto inaad la xiriirto iskuulkaaga ama aad u baahan tahay in lagaa caawiyo sidii aad u ogaan lahayn gargaarka aad uga baaan tahay PPS? Waxaad wacdaa Khadka Qoyska Luqadaha Faraha badan:
Español: 503-916-3582
[illegible]503-916-3585
Tiếng Việt: 503-916-3584
Soomaali: 503-916-3586
Русский: 503-916-3583.

**Istaraatijiyada 1 ee RESJ: Ka Qeybqaadashada Dhaqanka Qoska U Gaark ah**
**Waaxda ama Jaalkooda: Dadaalada Waalidinta Madow, IRCO, Latino Network, Self Enhancement Inc., Horizon Counseling, Kairos PDX, Xarunta Qoyska NAYA**
Ka qeybqaadashada qoska waa istaraatijiyada ugu sareysa sidii loo taageeri lahaa barashada ardayda sidii loo yarayn lahaa ama meesha looga saari lahaa caqabadaha hor taagan qoysaska aan cadaanka ahayn sidii ay ugu doodi lahaayeen baahiyaha ardaydooda. Waxaa jira cilmi baaris muhiim ah oo taageereysa wax ku oolnimada taageerada qoyska, u doodista iyo dhiirigalinta guusha taban ee ardayda iyo maxsuulka ka soo baxaya. Hoos waxaa ku yaal liistada barnaamijyo gaar ah oo la filayo inay addeeg ka bixiyaan barnaamij kasta:

| Iskaashiga RESJ | Iskuulada Addeegyada Bixiya 2020-21 |
|---|---|
| Dadaalada Waalidiinta Madow | Rosa Parks, Irvington, Chief Joseph, Sabin, Vernon |
| Immigrant and Refugee Community Organization (IRCO) | Jason Lee, Harrison Park, Kelly, Sitton |
| Latino Network - Juntos Aprendemos | Cesar Chavez, Scott, Lent, Sitton |
| Self Enhancement Inc. (SEI) | Boise, Woodlawn, King |
| Horizons Counseling - Youth Empowerment Program (YEP) | Vestal, Arleta, Sitton |
| Kairos PDX | Kairos, Early Learning Network |
| Native American Youth and Family Center (NAYA) | Applegate, Clarendon, Faubion, & District-wide |

## Agabyada iyo Taageerada Qoyska

Kuwani waa taageerada la siiyo daryeel-bixiyaal dhaqan gaar ah leh sidii ay beegsan lahaayeen jinsiga gaarka ah/asalka ama kooxaha ardayda ee luqado gaar ah ku hadla.





**Istaraatijiyada 2 ee RESJ 2: Addeegyada Isku Lammaan**
**Waaxda ama Jaalkooda: IRCO, Latino Network, Open School Step Up, POIC, SEI, Xarunta Qoyska NAYA**
In la bixiyo addeeg dhaqan gaar ah iyada laga jawaabcelinayo addeegyada lagu taageerayo waxbarashada ardayda iyo guusha bulsho ahaan. Waxaana ka mid ah maaraynta arrimaha, waxbarashada oo iskuulka marka laga baxo laga caawinayo/taageerada, addeegyada lagu gudbinayo, kooxaha u kulmayaan ardaydu, iyo kormeerida horumarka ay sameynayaan. Addeegyada isku lammaan waa dhammaystiran yihiin habka loo marayo kulanka baahiyaha ardayda. Hoos waxaa ku qoran liistada barnaamijyada gaar ah iyo iskuulada la filayo in barnaamij kastaa laga fuliyo:

| Iskaashiga RESJ | Iskuulada Addegyada Bixiya 2020-21 |
|---|---|
| Immigrant and Refugee Community Organization (IRCO) | Roosevelt, Madison, Cleveland |
| Latino Network - Early Escalera, Escalera and Colegio De Padres | Benson, Madison, Roosevelt, Franklin, Alliance, Jefferson |
| Iskuulku Wuu Furan yahay - Step Up | Madison, Franklin, Roosevelt |
| Portland Opportunities Industrialization Center (POIC) | Rosemary Anderson, Helensview |
| Self Enhancement Inc. (SEI) | Jefferson, Harriet Tubman |
| Xarunta Qoyska NAYA | Many Nations Academy, All District High Schools |

## Agabyada iyo Taageerada Qoyska

Kuwani waa taageerada la siiyo daryeel-bixiyaal dhaqan gaar ah leh sidii ay beegsan lahaayeen jinsiga gaarka ah/asalka ama kooxaha ardayda ee luqado gaar ah ku hadla.